



# KU SOO DHOWAADA KOOXAHA MUUSIKAALAYDA!

Dhammaan Kooxaha muusikaalaydu waxay u baahan yihiin xubno cusub oo ku biira, buugyarahan waxaad wax kaga ogaanaysaa kooxaha muusikaalayda iyo in ay ku biiristoodu adiga, Ilmahaaga amaba cid kale oo aad taqaanid ay anfici karto.








In aad ka mid ahaato koox muusikaalay oo kala qayb gasho garaacista/ ciyaarista qalabka muusikada ee kala duwan waa wax aad wadi kartid intaad abid nooshahay. Waxaad ka helaysaa saaxiibbo fiican oo aad ku kulantaan u tababarashada muusikada asbuuc kasta. Waxaad wadajir ugu wada tababaran doontaan sidaad muusikada uga tumi/garaaci lahaydeen riwaayadaha iyo xafladaha waawayn ee muusikaalaydu ka tunto/cayaarto. Ka mid ahaanta kooxahan waxaad ku kasban kartaa in aad wax ku biiriso ammaanka iyo wanaagga ku wada nolaanshaha xaafadda, waxaad kaloo ku kasban kartaa horumar iyo awood waxqabsi oo naftaada ah, waxaad kaloo ku kasban kartaa saaxiibbo iyo in aad ka mid noqoto dad wadajira ama isku tiirsan.

Norway waxaa ka jira 1600 oo kooxo muusikaalay oo xubnaha ka tirsani ay ka badan yihiin 60 000. Qofku da' duu rabo ha ahaado, lab ama dhaddig ama xirfadduu rabo muusikada ha u lahaade waa helalyaa kooxda uu rabo inuu ku biiro. Kooxaha muusikaalayda ee iskuulladu waxay u furan yihiin ardayda dugsiyada ee jira qiyaastii 7-19 sano, kooxda muusikaalayda ee dadka waawayna waxaa loogu talagalay dadka waawayn iyo dhalinyarada. Kooxdiiiba waxay ka koobnaan kartaa kooxo yaryar oo qalab-muusik oo kala duwan ciyaara iyo kooxo gooniya oo si wadajira qalabka muusikada u wada cayaara/tuma.





# MAXAA LOOGA MID NOQDAA KOOXAHAN?

## MUUSIKADA IYO BARASHADEEDA

Kooxda muusikaalayda waxaad ka baranaysaa sida loo ciyaaro mid ka mida qalabka muusikada ama sida loo tumo/garaaco qalabka saxannada iyo durbaanada ee wadajirka loo wada garaaco/cayaaro. Asbuucii hal ama laba mar ayay kulmaan xubnaha kooxda muusikaalayda iyo macallimiintoodu si ay ugu tababartaan muusikada. Kooxaha muusikaalayda ee ardayda dugsiyada waxay kaloo leeyihiin macallimiin u gaara oo muusikada bara. Xubin waliba Kooxaha sideeda ayay muhiim u tahay, Xubin walbana inta ay muusikada ka taqaan ayuunbaa hore looga si wadayaa.



## MEEL FIICAN OO AMAANA, QOFKUNA UU WAQTIGIISA FIRAAQADA KAGA FAA'IIDAYSAN KARO

Carruurta, dhalinyarada iyo dadka waawayniba waxay u baahan yihiin meelo/waxyaalo macno samaynaya oo ay waqtigooda qaaliga ah ee firaaqada ku qaataan.

Haddaba kooxaha muusikaalayda waxaad ka helaysaa:

- In aad barato sida loo ciyaaro/tumo/garaaco mid ka mida qalabka muusikada ama in aad barato habka muusikada ee kooxdu wadajirka u wada cayaarto/garaacdo/tumto.
- In aad barato saaxiibbo cusub oo da' walba leh, lab iyo dhaddigba. Waxaad is baranaysaan dadka deegaankaaga carruur iyo waawaynba.
- Waxaad baranaysaa hab wadashaqaynta dadka kale iyo isixtiraamka dadka.
- Waxaad ka qayqaadanaysaa riwaadaha la xiiseeyo, waxaad ka qaybqaadanaysaa siminaarada la qabto wiik-endhiyada iyo socdaallada kale ee kooxuhu u baxaan.

Qof kasta oo ka shaqeeya kooxaha muusikaalayda ee carruurta waxaa looga baanhan yahay in uu booliska ka soo qaato warqadda caddaynaysa in uu hore dembi u galay iyo in klae.



# DOORKA DADKA WAAWAYN EE KOOXAHA MUUSIKAALAYDA

Kooxaha muusikaalaydu waa ururro qofku si xor ah u doorto ugana shaqeeyo, waxaana hawlaha kooxaha socodsiiya xubnaha iyo waaliidiintooda. Kooxaha oo dhammi waxay leeyihiin maamul u qaabilsan kala wadista hawlaha iyo dhaqaale u samaynta kooxda. Qof kastaana kooxda wuu ku caawin karaa in uu hawlaha ururka wax kala qabto. Si iskaa wax u qabso ah ayay dadku kooxda wax ugu qabtaan, iskaa-wax-u-qabsadu sideedaba waa hab dadka deegaanka deriska ahi aad u tixgeliyaan. Waa hab fiican oo dadku isku bartaan waxna ku wada qabsadaan.



VIDAR ALVIK



KIM HUSBY



NORDBY SKOLEKORPS

# QALABKA MUUSIKADA

Kooxda muusikaalayda ee iskuulka qofku qalabka muusikada ee uu u baahdo wuxuu ka daynsan karaa kooxda. Asbuuc walbana qofka waxaa la baraa sida loo ciyaaro qalabka kala duwan ee muusikada.

Kooxdu waxay u baahantay dhaqaale ay ku bixiso macallimiinta, horjoogayaasha iyo qalabka muusikadaba. Kooxda dhaqaale ayaa uga dhigma dadka sida iskaa-wax-u-qabsada ah ugu shaqeeya, waxaa kale oo kooxdu dhaqaale ka heshaa lacagta ay xubnuhu bixiyaan. Degmooyin badan ayaa faamiliyada aan dhaqaale badan haysan ka caawiya lacagta xubinnimada ee kooxda muusikaalayda.



**Ma u baahantay adiga ama carruurtaadu in aad  
bilowdaan koox muusikaalay?  
La soo xiriir kooxda muusikaalayda ee xaafaddaada, iskuulka ama  
Ururka muusikaalayda ee Norway (Norges Musikkorps Forbund).**

**Halkan waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan  
kooxda muusikaalayda ee xaafaddaada:**



**Adiga ama ilmahaagu ma jeclaan lahaydeen inaad  
ciyaartaan, ama aad wax badan ka ogaataan Kvam  
iyo Sellanrå corps?  
Fadlan nagala soo xidhiidh [post@kvamsellanraa.no](mailto:post@kvamsellanraa.no)  
haddii aad wax su'aalo ah qabtid.**

**Carruurta da'doodu u dhaxayso 8 - 18 sano  
Ku celcelinta: Khamiista laga bilaabo 18:00 - 20:00  
dugsiga hoose ee Kvam (oo lagu daray casharrada  
gaarka ah ee Dugsiga Dhaqanka toddobaadkii hal  
mar)**

**PS! dadaalka waalidka ugu yar marka loo eego  
hawlaha kale.**

**W E L C O M E !**



Ururka Muusikaalayda Norway (Norges Musikkorps Forbund) (NMF) Waa urur ka mid ah ururrada ugu waawayn ee abaabula waxyaabaha dadku waqtiyadooda firaqada ay ku qaataan. Ururku NMF wuxuu kooxaha muusikaalayda ee ka tirsan u sameeyaa koorosoooyin xilliga xagaaga iyo tartanno. NMF wuxuu ka shaqeeyaa sidii ay kooxaha ka tirsani shaqada ugu fiican ugu qaban lahaayeen xunahooda.

Bogga internetka: **[musikkorps.no](http://musikkorps.no)**

E-mail: **[post@musikkorps.no](mailto:post@musikkorps.no)**